

# Koritaanka Maskaxda

Maskaxda waa la dhisaa. Khibradaheena ugu horeeya waxay saameyn ku yeeshaan koritaanka jirahaan ee maskaxda.



## SAMEE WADASHEEKAYSII

Caruurta waxay doonayaan inay ka qayb qaataan wada sheekaysiga! Is weydaarsashada xiriirada, xitaa ka hor inta aysan gaarin waqtiga hadalka, waxay caawinaysaa koritaanka maskaxda caruurta.



### ISKU DAY ARINTAN!

Imisa waqti ayaad la qaadan kartaa? Marka aad xiriir la samaynayso ilmaha yar, isku day inaad la wadaagto dhoola cadayn iyo cod hooseeya. Ama sii wad inaad waydiiso su'aalo la xiriira caruurta waqtiga xanaanada ku jirta si loo sii wado fikirhooda iyo wadasheekaysigooda!



## KA DHIG MID BULSHAAWI AH

Caruurta waxay si wanaagsan wax uga bartaan dadka kale. Dhexgalka bulshada waxay maskaxda u diraysaa fariin sheegaysa "tani waa muhiim!"



### ISKU DAY ARINTAN!

Caruurta inaga ayey na daawadaan waxna naga bartaan. Sidee dabeecadahaaga ugu adeegsan kartaa si aad uga caawiso inay wax kaa bartaan? Ma kaaga dayan karaan sida jaakada loo xirto, ama xitaa, sida saaxiib loo samaysto?



## MARKALE SAMEE!

Caruurta waxay jecel yihiin inay waxyaabaha sameeyaan markale, iyo markale! Ku celcelinta waa qaabka aan wax u barano. Sidoo kale waxay dhisaysaa xiriirada jirka ama wadooyinka dhanka maskaxda.



### ISKU DAY ARINTAN!

Ma leedahay buug ama hees aad ugu jeceshahay? Ka fikir wax ku saabsan qaababka ay ku noqon karaan qayb ka mid ah hawl maalmeedkaaga. Heesta maku heesi kartaa marka aad dharka xiranayso? Ama maka hadli kartaa wax ku saabsan eeyaha ku qoran buuga aad ugu jeceshahay marka aad joogto darjiinka eeyaha?

Booqo

[outreach.ilabs.uw.edu](http://outreach.ilabs.uw.edu)

si aad u hesho ilo macluumaad dheeraad ah oo bilaash ah

INSTITUTE FOR  
LEARNING  
& BRAIN  
SCIENCES